

Maxay tahay waxa aan ka oggaanayo dheefaha Cuntada Aasaasiga ah?

Dadka Qoyska	Xadka Dakhliga Bil Kasta*
1	\$2,608
2	\$3,525
3	\$4,442
4	\$5,358
5	\$6,275

*Qaddarada waxaa la cusboonaysiiyaa Abriil kasta

Dadka intooda badan ma lahan xaddidaadaha dakhliga saafiga ah ama khayraad.

- Marka aad hesho Cuntada Aasaasiga ah, waxaad xaq-u-yeelan kartaa barnaamijyo kale:
- Barnaamijka raashiinka iskuulka ee qiimaha-jaban ama bilaashka ah.
- Barnaamijka nafaqada gaarka ah ee loogu talagalay Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta ama WIC.

Uma baahnid inaad ahaato muwaadin mareykan ah si aad u hesho dheefaha cuntada

Muhaajiriinta buuxiya sharciyada barnaamijka gaarka ah ee waafaqsan Barnaamijka Nafaqada Dheeriga ah ee Federaalka ayaa xaq-u-yeelan kara Dheefaha Cuntada. **Haddii aad hesho dheefo cunto ah, laguuma tixgelin doonna in aad ku tiirsan tahay dheefaha dowladda (public charge).**

Muhaajiriinta sharci-darada ah, dalxiisayaasha iyo dadka kale ee aan muhaajiriinta ahayn xaq uma lahan dheefaha cuntada.



Sideen ku codsanayaa?

Waxaad ka codsan kartaa telefoonkan 877-501-2233 ama Xafiiska Adeegyada Bulshada ee ugu dhow. Looma baahna in aad buuxiso codsi ka hor inta aanan lagula yeellan waresyigaaga xaq-u-yeelashada.



Waxaad sidoo kale 24/7 ka codsan kartaa barta internet-ka washingtonconnection.org ama boostada. La-soco si aad ugu sameyso waresyigaaga xaq-u-yeelashada 877-501-2233 ama Xafiiska Adeegyada Bulshada ee ugu dhow.

Fakis: 888-338-7410

Cinwaanka boostada:

DSHS Customer Service Contact Center

P.O. Box 11699

Tacoma, WA 98411-6699



DSHS 22-1301 SM (Rev. 4/25) Somali

Hay'adan waxay bixisaa fursad loo siman yahay.

Ikhtiyaarada Cuntada
Caafimaadqabka leh ee
loogu talagalay hab-
nololeedka caafimaadka leh

Cuntada Aasaasiga ah



SNAP

Barnaamijka
Gargaarka
Nafaqada
Dheeriga ah

Waa maxay Cuntada Aasaasiga ah?

Cuntada Aasaasiga ah, sidoo kale loo yaqaanno Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeriga ah ama SNAP, wuxuu dadka ku caawiyaa in ay iibsadaan raashiinka.

Qoysaska xaqa u leh waxay helaan kaarka Xawilaadda Dheefaha Elektarooniga ah, ama EBT, oo ay ku jiraan dheefo bil kasta ah oo cunto looga iibsan karo dukaamada raashiinka iibiya ee ka qaybqaadanaya.



Ma ogtahay? In aad ku isticmaali kartid dheefaha Cuntada Aasaasiga ah ee EBT suuqyada beeraleyda. In aad sidoo kale u isticmaali kartid in aad ku iibsato dhirta ama abuurka cuntada soo saara ama la beerto.

Dadka Waaweyn ee Awoodda leh ee aan lahayn dad Ku-tiirsan

Adiga ama xubin ka tirsan reerkaaga ayaa looga baahan karaa in ay ka soo baxaan shuruudaha shaqada ABAWD (Dadka Waaweyn ee Awoodda leh ee aan lahayn dad Ku-tiirsan) idinka oo shaqeynaya celcelis ahaan 80 saacadood bishii (ama 20 saacadood toddobaadkii), ka qaybgalka shaqo la ansaxiyay ama barnaamij tababbar oo loogu talagalay celcelis ahaan ugu yaraan 80 saacadood bishii ama in ay si iskaa ah ugu shaqeeyaan barnaamij shaqo oo mushaar la'aan ah, oo la ansaxiyay.

Haddii aad rabto macluumaad badan oo ku saabsan adeegyada BFET, booqo mareegtada:

dshs.wa.gov/BFET

Cuntada Aasaasiga ah miyay iga caawin kartaa tababbar ama shaqo helid?

- Haa! Haddii aad qaadato Cuntada Aasaasiga ah, waxaad si iskaaga wax-u-qabso ah ugu qaybqaadan kartaa Barnaamijka Tababbarka iyo Shaqada ee Cuntada Aasaasiga ah.
- Barnaamijka BFET wuxuu bixiyaa adeegyada shaqo-raadin, tababarka shaqo raadinta, adeeyo waxbarasho, tababar xirfadeed, iyo fursado kale oo shaqo oo loogu talagalay dadka qaata Cuntada Aasaasiga ah.

Uurro faro badan ayaa bixiya caawimaadda gaadiidka, daryeelka carruurta ama kheyraad kale oo kugu caawin kara in aad ka shaqeyso yoolalkaaga shaqo. Adeegyada waxaa la bixiyaa iyadoo loo marayo uurro ku saleysan bulshada waxayna bixiyaan xirfado iyo qaybo shaqo badan oo kala duwan.

